Caddad Gaar ah oo ku saabsan HIV/AIDS



# Carruurteena "our children"

Warsidaha UNICEF Soomaaliya | Disembar 2008

## U midoobidda la dagaallanka AIDS-ka, u midoobidda carruurta Soomaaliyeed daraaddood

1dii Jannaayo waxa ay ahayd sanad-guuradii 10aad ee Maalinta AIDS-ka Adduunka. U dabaal-degidda Maalintaan ayaa la bilaabey 1998 ka dib markii wasiirro caafimaad oo dunida oo dhan ka kala socda ay ku heshiiyaan in ay maalin gaar ah u aqoonsadaan muujinta muhiimadda wax ka qabashada HIV iyo AIDS iyo in dadku ay u midoobaan wax ka qabashada cudurkan dunida ku faafaya. Guud ahaan Soomaaliya, UNICEF waxa ay NGO-yada la hawlgala iyo Guddiyada AIDS-ka kala qaybqaadatey muujinta guulaha muhiimka ah ee sanadihii dhowaa laga soo hoyey si loo xakameeyo fiditaanka iyo dhibaatada HIV iyo AIDS-ka. Dabaaldegga ayaa sidoo kale na xusuusiyey shaqada muhiimka ah ee weli dhimman ee ay tahay in la qabto.

'Wax hogaaminta' ayaa ahayd arrinta diiradda la saarey Maalinta AIDSka Adduunka ee 2008da, iyada oo la tiigsadey hal-ku-dhiggii ahaa: "**Jooji AIDS-ka. Balanta Adkeey.**" Soomaaliya waxaa ka jirey hoggaan heer sare ah oo dhinaca wax-ka-qabashada AIDS-ka ah. Jiritaanka hoggaan siyaasadeed oo wanaagsan ayaa waxaa daliil u ah sameyntii la sameeyey saddex guddi oo aan gaarsiisneyn heer qaran sanadihii 2006 iyo 2007, taas oo ka dhigneyd tallaabo muhiiim ah oo loo qaadey dhinaca yoolka la higsanayo ee in sanadka marka uu yahay 2010 la helo barnaamijyo ballaaran oo ka hortag, daaweyn, daryeel iyo taageeridda dadka qaba cudurka. Hoggaan bulsho oo wanaagsan ayaa ay Soomaalidu muujiyeen iyada oo dadka tuulooyinkooda ka shaqeynaya ay si xooggan wax uga qabteen hoggaaminta barnaamijyo taabogal ah oo sii jiri karana kuwaas oo looga dan leeyahay kor u qaadidda wacyiga dhalinyarada iyo carruurta.

Wax hogaaminta haweenka ayaa iyana laga arki karaa dalladaha/shabakadaha dadka ku booqanaya guryaha iyo shirarka ay yeelanayaan bulshooyinka kuwaas oo waxbaraya bulshada inteeda kale oo dhiirigelinayana sidii lagu heli lahaa adeegyada. Hogaaminta dhalinyarada ayaa laga arkey horumar sare iyada oo dhalinyaro tiro badan ay mar walba ku soo biirayaan dadaallada wax looga qabanayo HIV iyo AIDS iyaga oo sameynaya ololayaal warbaahineed iyo iyaga oo ka tallaabsanaya caqabadaha si ay si saraaxad leh oo furan uga munaaqashoodaan cudurka iyo si ay uga qayb-qaataan barnaamijyada xirfadaha-nolosha ee looga dan leeyahay kor u qaadista awooddooda hoggaamineed.

Iyada oo degannaan-la'aan jirto, iskahor-imaadyadu socdaan, dhaqaaluhana jilicsan yahay, haddana kartida hoggaamineed ee ay dhinaca wax ka qabashada AIDS-ka ee Soomaaliya waxa ay muujineysaa awoodda ay dadka Soomaaliyeed u leeyihiin in ay u midoobaan danta guud iyo in ay gacmaha is-qabsadaan sidii wax looga qaban lahaa fiditaanka iyo eelka cudurkan faafa. UNICEF waxa ay nasiib u yeelatey in ay dadaalkan la kaashato 40 la-hawlgale. Waa carruurta Soomaaliyeed kuwa ugu dambeynta ka faa'iidaya iskaashigan maaddaama aan u midowney sidii carruurta aan uga ilaalin lahayd dhibaatada AIDS-ka.

Soomaaliya nasiib ayaa ay leedahay maaddaama ay ballan-qaad adag ka heshey Sanduuqa Caalamiga ah ee la dagaallanka AIDS-ka, Qaaxada iyo Duumada (GFATM) kaas oo bixinaya dhaqaale lagu tashan karo oo sanado socda, kaas oo lagula dagaallamayo cudurka. Tani waxa ay Soomaaliya ka dhigeysaa mid nasiibkeeda ku heshey dhaqaale badan oo lagula dagaallamo HIV inta uu cudurkan faafa uu weli yar yahay – taas oo dalka siineysa fursad ballaaran oo uu ku ilaaliyo dadkiisa iyo jiilalka soo socdaba.



Christian Balslev-Olesen
Wakiilka UNICEF, Soomaaliya

**CADDADKAN KA AKHRISO**


| | |
|---|---|
| Faallada Wakiilka | 1 |
| 44,000 oo la nool HIV | 1-2 |
| Legdidda HIV iyo AIDS ee Muqdisho | 2-3 |
| Dalladaha haweenku wax bey qabteen | 3 |
| Sanduuqa Caalamiga | 4-5 |
| Qaan-gaarka iyo HIV | 5 |
| Nagala soo xiriir | 5 |


## 44,000 oo qof ayaa lagu qiyaasey dadka la nool HIV/AIDS ee Soomaaliya

eeg bogga 2aad

Waxaa hadda Soomaaliya ku nool dad lagu qiyaasey 44,000 oo qaba HIV iyo AIDS. Xaddiga baahsanaanta HIV-ga Soomaaliya waxa uu wax yar ka hooseeyaa 1% laakiin ma jirto farxad lagu faraxsan yahay in la gaarayo Yoolka Kun-sanaadka ee joojinta HIV iyo AIDS sanadka 2015.

Soomaaliya waxaa culays gaar ah ka haystaa maareynta barnaamij ku filan oo lagula dagaalamo HIV iyo AIDS iyada dhexda looga jiro xaalado degdeg ah oo ba'an oo haddana daba dheeraadey kuwaas oo ay keeneen iskahorimaadyada socda iyo masiibooyinka dabiiciga ah. Xaaladdan oo kale, waxaa aad muhiim u ah in feejignaan gaar ah loo yeesho jilicsanaanta haweenka iyo gabdhaha, carruurta iyo dadka la fogeeyo. Qaraarkii Ballan-qaadka ahaa ee ku saabsanaa HIV/AIDS ee laga soo saarey sanadkii 2001 Golaha Loo Dhan yahay ee Qaramada Midoobey shirkoodii gaarka ahaa ee HIV/AIDS-ka ku saasanaa (UNGASS) waxaa lagu aqoonsaday jilicsanaanta dadka iskahorimaadyadu ay saameeyeen. Waxa uu ku baaqey sameynta iyo hirgelinta istiraatiijiyado isugu jira wacyi-gelin, ka hortag, iyo daryeel iyo daaweyn oo la isugu keeno barnaamijyo iyo tallaabooyin la qaado oo si habboon oo taabogal ah wax loogaga qabanayo xaaladaha degdegga ah. Dhinaca arrimaha degdegga ah marka laga hadlayo, doorka ay rabshadaha ku saleysan jinsiga iyo sida ay uga qayb qaataan faafidda HIV iyo AIDS ayaa loo baahan yahay in si gaar ah loo iftiimiyo.

Iyada oo la aqoonsanayo culeysyada gaarka ku ah Soomaaliya marka wax laga qabanayo HIV iyo AIDS, waxaa loo baahan yahay in la ogaado in HIV uu siyaabo kala duwan u saameynayo dadka

**Dalladaha Dadaallada Haweenka ku Aaddan ayaa muhiim u ah la dagaallanka HIV-ga ee heer bulsho...**

## 44,000 oo qof oo Soomaaliya jooga ayaa lagu qiyaasey in ay la nool yihiin AIDS

Soomaaliyeed ee ku kala nool saddexda soone (Waqooyiga Galbeed ee Soomaaliya ama "Somaliland", Waqooyiga Bari ee Soomaaliya ama "Puntland", iyo Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya) iyo weli sida uu u saameynayo soonanka dhexdooda.

Lama hayo xogta *sero-surveillance* ee lagu qiimeeyo heerarka guud ahaan dadka qaba cudurka ama koox gaar ah oo loo tiriyo in ay ka mid tahay dadka halista ugu weyn ugu jira qaadista HIV. Haseyeeshee, sahan 2004 ay sameeyeen xarumaha caafimaadka ee uurreyda, waxa ay tuseen in Soomaaliland uu wax yar ku badan yahay (1.7%), waxaa ku soo xiga Puntland (0.5%), iyo Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya (0.3%). Bukaannada qaba qaaxada ee uu u weheliyo HIV waxaa lagu qiyaasey 4.5%. Sida uu ugu badan yahay bukaannada qaba caabuqyada galmada la isugu gudbiyo waa 6.3% waxaana uu ku badan yahay ragga (7.4%) marka la barbar-dhigo haweenka (5.4%). Xarunta caafimaadka uurreyda ee ku taalla magaalada dekadda leh ee Boosaaso ayaa tustey in ay si aad ah u kordheen dadka laga heley cudurka 0.0%, 2.3%, iyo 2.7% oo ay kala ahaayeen sanadihii 1999, 2004 iyo 2007 sida ay u soo kala horreeyaan. Goobaha kale, ee Puntland iyo Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya ayaa iyana la ogaadey in ay qaab noocaas oo kale ah leeyihiin.

Iyada oo la tix-gelinayo kala duwanaanshaha dadka qaba cudurka iyo iyada oo la aqoonsanayo nugeylka kooxaha qaar ee ku nool degaannada ay ka jiraan xaaladaha degdegga ah, iyo dadaalka ay bixiyeen hay'adaha Qaramada Midoobey iyo kuwa Dowladda ee la-hawlgala, UNICEF waxa ay si dhow ula shaqeyneysaa haweenka, dhalinyarada, culumada iyo madaxda dhaqanka iyo weliba xarumaha daryeelka caafimaadka si wax looga qabto cudurkan.

Dadaalka hadda jira ee wax looga qabanayo ka hortagga HIV, daaweyntiisa iyo daryeelka dadka qaba waxaa hagaya ururada bulshada ku dhisan. Ka qaybgelinta ururada haweenka oo iyada oo qayb ka ah shabakadaha dadaallada haweenka ku aaddan ayaa weli ah mid ka mid ah habka ugu taabogalsan ee wax looga qabanyo HIV iyo AIDS si heer bulsho ah Soomaaliya oo dhan. Shabakadahani waxa ay bixinayaan casharro ay isa siiyaan dadka isku filka ah, gole-ka[hadal, iyo booqashooyin guriga ah (faahfaahinta ka eeg sheekada "Haweenka ka soo baxay ballanta" ee bogga 3aad). Tani waxaa barbar socda hawl wacyi-gelin ah oo lala kaashaday culumada iyo hoggaamiye dhaqmeedyada si loo hubiyo in la helo taageero lagu dhimo ceebeynta iyo takoorka iyada oo markaana la dhisayo xirfadaha looga hortago HIV-ga.

Waxqabad muddada fog looga guuleysto HIV iyo AIDS-ka Soomaaliya waxa uu ku xirnaan doonaa kordhinta barnaamijyada ka-hortagga ee bulshada ku dhisan iyo iyada oo lala shaqeeyo dhalinyarada oo ah kuwo isbeddelka keena. La shaqeynta ururada haweenku waxa ay xoojisey waxqabadka bulshada ku dhisan waxaana dadaallada noocan ah muhiimad u leh in ay taageero heerkeedu sarreeyo ka helaan hogaamiyeyaasha diinta. Shaqeynta Guddiga AIDS-ka ee heerka qaran ka hooseeya waxa ay xoojineysaa jawiga siyaasadeed/habraac iyo kan maamul ee ay kooxahani ku shaqeynayaan waana in dadaal lagu bixiyaa wadahadal iyo isku-xirnaan dhex marta kooxaha ku dhisan bulshada iyo hay'adaha maamulka. Dadka Soomaaliyeed waxa ay gaareen guulo badan oo ku aaddan wax ka qabashada HIV iyo AIDS, laakiin wax badan ayaa weli dhimman. Haddii aan wax laga qaban HIV iyo AIDS, xitaa haddii hadda uu dalka ku yar yahay, waxa ay wax u dhimeysaa gaaridda Yoolalka kale ee Horumarka Kun-sanaadka ee muhiimka ah. HIV iyo AIDS waxa ay curyaamin karaan horumarkii laga gaarey wanaajinta caafimaadka hooyada iyo dhallaanka iyo yareynta tirada carruurta dhimaneysa. Soomaaliya awood uma yeeleneyso in ay wax ka qabato HIV iyo AIDS haddii aan lagu dadaalin Yoolalka kale ee Hoarumarka Kun-sanaadka ee ah ciribtirka saboolnimada ba'an iyo gaajada iyo kor-u-qaadista sinnaanta dheddig-laboodka iyo awood-siinta haweenka. Dhammaan kooxaha iyo waaxaha waa in ay ka qayb-qaataan waxqabad la iskudubaridey oo dhinacyo badan laga wajaho HIV iyo AIDS-ka. Arrintani ayaa si isa soo tareysa loo gaarayaa taas oo mahaddeedu ay leedahay iyada oo si taxaddar leh hawsha HIV/AIDS loo dhex-geliyey Qorshaha Xilliga Kalaguurka Soomaaliya ee Qaramada Midoobey iyo Geeddi-socodka Codsiyada Iskujira ee lagu beegsanayo dadweynaha u baahan gargaarka bani'aadamnimada.

## 'Halihii iga dhinnaa' - Legdidda HIV iyo AIDS ee Muqdisho

"Isla markii uu tababarku ii dhammaadey, awood weyn ayaan lahaa waxaana aan rabey in waxyaabo badan wax ka beddelo isla waqtigaa," ayaa ay tiri Safiya Abubakar Karraani (bidix ku sawiran), oo deggan Degmada Cabdilcasiis ee magaalada Muqdisho. Arrintani waxa ay dhacdey sanadkii 2005 markii ay si guul ah u dhammeystey tababar ku sabsan HIV iyo AIDS iyo Jinsiga/dheddig-laboodka ee ay qabanqaabisey Hay'adda Health Unlimited, oo la-hawlgasha UNICEF. Waqtigaas, Safiya oo 41 jir ahayd waxa ay sheekooyin ay kaga hadleyso arrimo kala duwan oo kuwa bulshada ah ay ku qoreysey wargeyska Bilan, ee ay soo saarto Xarunta Soomaaliyeed ee Awood-siinta Haweenka. Urrkaas oo ay hadda iyadu madax ka tahay, waxa uu haweenka Soomaaliyeed siiyaa xirfado ay ka mid yihiin Kombuyutarka, harqaanka, farsamada gacanta, iyo khibrado ganacsi.

Wargeyska Bilan waxa uu arrimo badan sida waxbarashada, biyaha iyo caafimaadka ka eegaa dhinaca jinsiga/dheddig-laboodka. Laakiin arrinta aan sida weyn muhiimadda loo siinin waxa ay ahayd HIV iyo AIDS. "In kasta oo uu wargeysku si uun u eegi jirey cudurka, haddana wax loogama qori jirin si caadi ah ah oo joogto ah oo xog badan bixineysa," ayaa ay tiri Safiya. "Fikradda keliya ee aan ka haysaney HIV iyo AIDS waxa ay ahayd mid aan ka qaadanney buug aan ka helney Kenya kaas oo ka hadlayey arrimo badan oo la xiriira cudurka."

Tababarka ka dib, Safiya waxa ay dib ugu noqotey ururkeedii iyada oo ah haweeney wax higsaneysa. Isla markiiba waxa ay qortey maqaal ku saabsan sababta ay haweenku ugu nugul yihiin HIV-ga. "Dhibaatada ugu weyn ee aan qabey waxa ay ahayd sidii aan isugu xiri lahaa HIV iyo AIDS-ka iyo jinsiga si qancin karta haweenka iyo ragga Soomaaliyeed iyo sidoo kale saraakiisha dowladda." "Tababarkaa ayaa ii suurageliyey in aan qoro sheeko arrintaa dhinac ka eegeysa," ayaa ay raacisey. Markii la daabacay sheekadaan, ururkeedu waxa uu qabtey kulan ay uga hadleen sidii arrimaha HIV iyo Jinsiga ay si joogto ah wax uga qori lahaayeen. Waxaa markaa la go'aansadey in maqaal diiradda saaraya HIV iyo AIDS lagu daro wargeyska.

## 'Halihii iga dhinnaa' - Legdidda HIV iyo AIDS ee Muqdisho

In kasta oo maqaalkan cinwaankiisu ahaa Ma Oggahay in uu Jiro HIV/AIDS, wargeysku waxa uu haddana kaga hadli jirey arrimo badan oo la xiriira jinsiga iyo cudurkaas. Maqaalku waxa kale oo uu bixinayaa fursad Safiyo iyo dadka kaleba ay ku wadaagaan fikirkooda la xiriira cudurka iyo sida wax looga qaban karo. Ilaa bilowgii sanadka 2008, Safiyo, oo hooyo afar dhashey ah, waxa ay 11 maqaal ka qortey HIV iyo AIDS-ka, waxaana ay isu diyaarineysaa in ay qabato waxyaabo kale ka hor inta aanu sanadku dhammaan. "Waxa aan beegsanayaa in aan qoro 20 maqaal, waxaana aan rajeynayaa taas in aan gaari doono inta aanu sanadku dhammaan," ayaa ay tiri. Safiya waxa ay rajeyneysaa in qoraalladeedu ay keenaan in dadka ay u dheganuglaadaan dadaallada kor loogu qaadayo wacyiga dadka ee ku saabsan HIV-ga.

Haseyeeshee, Safiya waxa ay ka baqeysaa in haddii iibsashada wargeysku ay sida ay hadda tahay u sii hooseyso, in uu xirmo Wargeyska Bilan. Dagaallada Muqdisho iyo hareeraheeda oo ah suuqa ugu weyn ee wargeyska ka socda ayaa keeney in iibsashada wargeysku ay hoos u dhacdo 50% oo ah min 600 oo nuqul oo uu ahaa 2007 ilaa 300 oo nuqul oo uu yahay 2008da. "Waxa aan u baahannahay taageero maaliyadeed iyo mid dadeed si aan u sii wadno soo saaridda wargeyskan," ayaa ay si quus ah u tiri. Waxa niyadjabka ugu weyn ku keenaya waa iyada oo dhibaatooyinkani dhacayaan waqti ay bulshadu hadda un bilowdey in ay oggolaadaan xogta HIV iyo AIDS-ka. "In kasta oo dhibaatooyinkani jiraan, haddana rajooyin kale ayaa laga qabaa dhinacyo kale," ayaa ay tiri Safiya. "Dadku si tartiib ah ayaa ay u oggolaanayaan in uu HIV ka jiro Soomaaliya waxaana ay diyaar u yihiin in ay qaataan farriimaha. Muqtaqbalku waa uu ifayaa."

## Haweenka ka soo baxay ballanta – abuurista shabakado wax qabta

'Dadaalka Haweenka Ku Aaddan' waa dallad ururo haween oo ku fidsan Soomaaliya oo dhan kuwaas oo bulshooyinka gun ahaanula shaqeeya si ay warka u siiyaan, wax u baraan ayna u dhiirigeliyaan haween kale si ay kor ugu qaadaan aqoontooda ku saabsan HIV iyo AIDS, ayna u dhiirigeliyaan horaminta wax hoggaaminta haweenka iyo gabdhaha qaangaarka ah iyo in ay kor ugu qaadaan helidda adeegyada ka hortagga, daaweynta iyo daryeelka. Dadaalka Haweenka Ku Aaddan waxa ay sidoo kale lagu eegayaa arrimaha la xiriira Kufsiga iyo Rabshadaha Jinsiga ku Saleysan. Tababarayaasha bulshada ee Dalladaha Dadaalka Haweenka Ku Aaddan waxa ay diirradda saarayaan waxqabadyada ay ka mid yihiin waxbarashada dadka iskufilka ah, dood-wadaag ku aaddan gaaridda iyowacyiga iyo booqashada guryaha. Sanadka 2008, ururada haweenku waxa ay gaareen 9,810 haween iyo gabdho qaan gaar ah isugu jira iyaga oo u marey waxqabadyada waxbarashada dadka iskufilka ah oo Soomaaliya oo dhan laga fuliyey. Intaa waxaa dheer, in la qabtey dood-wadaag bulshada ku dhisan oo ku saabsan wacyiga dadka ee HIV iyo AIDS-ka, iyada oo la gaarey 21,314 haween iyo gabdho qaan-gaar ah. Ilaa hadda, haweenku waxa ay gaareen 5,089 guri oo ay ku nool yiiin qoysas ka kooban xubno ka badan 7,000 oo qof.


Tababare NGO ka socota oo koox haween ah Marka kubareysa sida looga hogtago HIV© UNICEF Somalia/2008

Mashruucan oo lagu soo darey in guryaha dadka lagu booqdo ayaa lagu gaarey natiijooyin wanaagsan sanadkii ugu horreeyeyba. Intii guryaha la booqanayey, tababarayaasha Dadaalka Haweenka Ku Aaddan waxa ay gargaareen carruur ay hayso nafaqo-xumo iyo haween uur leh, waxa ay la hadleen oo ay qoysaska bareen hab-dhaqanka fayadhowrka iyo nadaafadda heer qoys, waxaana haweenka carruurta leh ay u direen xarumaha tallaalka. Haweenka gobolka Baay ee ka mid ah Dadaallada Haweenka Ku Aaddan ee Bartamaha Soomaaliya waxa ay xusuusteen xaalad ku dhacdey haweeney ninkeedu uu u dhintey xannuun la xiriira AIDS-ka. Waxaa haweeneydaa la soo gudboonaadey dayacaad kaga timid qoyskeeda iyo saaxiibadeed, waxaana loo sheegey in ay magaaladeedii ka guurto waxaana ay degtey Baydhabo iyada oo wadata saddexdeeda caruurta ah. Mana haysan daawo. Haweenkii ka socdey Dadaallada Haweenka Ku Aaddan waxa ay isla markiiba arrinteedii kala hadleen xubnaha qoskeeda iyo saaxiibadeedii. Haweeneydii waxaa ay martey La talin iyo Baaritaan Iskeed ah waxaana daawada *Anti-Retroviral (ARV)* loogu direy magaalada Marka. Markii marar badan lala taliyey haweeneydii iyo qoyskeeda, waxa ay hadda heleysaa taageero waxaana daryeelaya qoyskeeda. Waxa dhowaan magaalada Marka ku qaadan doontaa daawada ARV, oo laga heley UNICEF iyada oo maaliyaddana ay ka timid Sanduuqa Caalamiga ah ee la dagaallanka AIDS-ka, Qaaxada iyo Duumada (GFATM).

Puntland, Xaliimo Maxamed Yuusuf iyo Nasra Cabdullaahi waxa ay tababareyaasha Dadaalka Haweenka Ku Aaddan ka yihiin Boosaaso. Hawlahooda toddobaadlaha ah waxaa ka mid ah qabashada dood-wadaag HIV ku saabsan iyo booqashooyin guryaha ee xerooyinka dadka gudaha ku barokacay ee 100ka Buush. Maryan waxa ay sidoo kale ka qayb gashey dood-wadaag bulshada dhex martey oo ku saabsan HIV iyo AIDS. Iyaga oo mar dambe booqanaya guriga Maryan, ayaa Xaliimo iyo Nasra waxa ay kala sheekeysteen muhiimadda ay leedahay in la iska baaro HIV iyo adeegyada uu bixiyo Cubitaalka Boosaaso. Maryan oo ay taageerayaan Xaliimo iyo Nasra, waxa ay go'aansatey in ay aaddo La talin iyo is-baaris Iskeed ah. Maryan waxa ay u bogtey adeegsada La Talinta iyo Baarista waxana ay sidoo kale ku dhiirigelisey saaxiibadeed in ay iyagana is-baaraan. Degaanka 100ka Bush waa meel ka mid ah meelaha ay aqoonta HIV ay u leeyihiin hooyooyinka iyo gabdhaha saboolka ah ee nugili ay aad u kooban tahay. Haseyeeshee, dadaallada ay bixiyeen tababarayaasha Dadaallada Haweenka Ku Aaddan ee la xiriira bixinta xog sax ah oo ku saaban HIV oo la siiiyo hooyooyinka ayaa u muuqda in ay si wanaagsan uga qayb qaadanayaan sidii si sax ah ay haweenku ugu fahmi lahaayeen ka hortagga HIV-ga, daryeelka, daawenta iyo taageerada dadka qaba HIV-ga. In kasta oo ay kuwan yihiin laba tusaale oo ka mid ah hawlaha ay qabteen dalladaha Dadaallada Ku Aaddan Haweenka, waxaa haddana jira haween kale oo badan oo lagu gaarey dadaalladan oo sheekooyinkooduna ay yihiin kuwo cajiib ah. Nolosha kumannaan haween iyo gabdho ah ayaa ay beddeshey hawl-karnimada iyo daacadnimada koox haween ah kuwaas oo gaarsiiyey natiijooyin aad u sarreeya haween iyo carruur ku nool xaalado adag. Hoggaanka iyo geesinimada ay muujiyeen haweenkan ayaa tusinaysa in in kasta oo uu cudurku sii noqonayo mid haweenka ku badan, haddana haweenka ayaa ah mid ka mid ah kuwa gacanta ugu weyn ka geysta wax ka qabashada HIV iyo AIDS.

**Hal canug yuusan u dhimman AIDS iyada oo aqoontii looga hortegi lahaa ay jirto...**

## Guuliha Sanduuqa Caalamiga ah uu ka gaarey Soomaaliya – Xaqiiqooyin iyo Tirooyin



Dhalinyaro Muqdisho kaga qaybgaleysa tababar ay qabteen Ururka Ilaalinta iyo Horumarinta Bulshada, oo ah NGO Soomaaliya ka dhisan. © UNICEF Somalia/2008

Baraamijyada taabogal ah oo ku saabsan ka hortagga, daaweynta, daryeelka iyo taageeridda ee HIV iyo AIDS waxa ay ku tiirsan yihiin xog. Bulshooyinka oo ay ku jiraan dhalinyarada ayaa la baraa xaqiiqooyinka lagu yareynayo halista qaadista HIV. UNICEF iyo la-hawlgalayaasheedu iyaga oo u maraya dadaallada u qareemeynta waxa ay baraan u dulqaadashada iyo oggolaanshaha waxaana ay kor u qaadaan helidda adeegyada kala duwan ee la xiriira HIV-ga.

Xaqiiqooyinka iyo tirooyinka waxaa loo adeegsadaa muujinta sida uu cudurku culeys ugu hayo haweenka iyo horumarkooda iyo sida, haddii aanan si habboon u dhaqmin, waxa innoogu qiimaha badan adduunka oo carruurteena ah ay ugu dhimanayaan cudur si dhab ah looga hortagi karo loona daweyn karo. Sidoo kale waxa aan xaqiiqooyinka iyo tirooyinka u adeegsanaa qorsheynta – in aan isku dayno in aan tallaabooyin ka horreyno cudurka. Maaliyadda ka timaadda Sanduuqa Caalamiga ah ee la dagaallanka AIDS-ka, Qaaxada iyo Duumada (GFATM) ayaa ah hanti muhiim u ah in la isla qorsheeyo wadajirna wax looga qabto cudurka HIV iyo AIDS-ka ka jira Soomaaliya.

UNICEF waxa ay ciyaareysaa kaalin aan masalkeeda jirin maaddaama ay tahay hay'adda ugu weyn ee hesha Dhaqaalaha ka yimaada Sanduuqa Caalamiga ah ee HIV/AIDS iyo iyada oo Guddiga Waaxda Caafimaadka ee Soomaaliya la wadaagta xiriirinta hawlaha 35 NGO/la-hawlgalayaal, saddex hay'adood oo Qaramada Midooobey ah iyo saddex Hay'adood oo Dowladda ah. Baragaraafkan soo socda ayaa muujinaya natiijooyinka sanadka 2008 lagu gaarey wadashaqentan.

UNICEF iyo UNDP ayaa la shaqeeyey 763 hogaamiyeyaal bulsho, diimeed iyo siyaasadeed si loo xoojiyo waxqabadka hoggaamiyeyaasha ee HIV iyo AIDS; iyada oo loo marey la-hawlgalayaal NGO-yo caalami ah iyo kuwo degaanka ah oo ay WHO taageertey, waxaa 3,307 shaqaalaha daryeelka caafimaadka ah la siiyey tababar iskujira oo ku saabsan ka hortagga, daawenta iyo daryeelka dadka qaba HIV iyo AIDS; waxaa la taageerey 17 xarumo caafimaad si ay u bixiyaan adeegyo caafimaad oo la xiriira HIV iyo AIDS oo ay ku jiraan baaritaanka Caabuqyada Galmada La isugu Gudbiyo, daaweynta iyo La-talinta iyo Baaritaanka Ikhtiyaariga ah; xarumahan waxaa lagu baarey 5,709 dhiig-bxiyeyaal waxaana jirta in lix xarumood ay hadda bixinayaan waxqabadyo sarreeya oo ku saabsan ka hortagga, daaweynta iyo daryeelka dadka qaba HIV iyo AIDS. Intaa waxaa dheer, in UNICEF ay sii waddo taageerada ay siiso xarumaha caafimaadka ee bixiya barnaamijyada looga hortago in hooyooyinku ay cudurka u gudbiyaan carruurtooda iyo u dirista hooyooyinka qaba HIV iyo carruurtooda loo diro xarumaha bixiya adeegyada isugu jira ka hortagga, daaweynta iyo daryeelka kuwaas oo bixiya daaweynta *antiretroviral.*

Intaa waxaa dheer, in WHO ay soo dhammeystirtey sahanka *sero-prevalence* ee HIV-ga iyo Waraabowga ee dadka bixiya adeegyada dhalmada ka horreeya iyo bukaannada qaba Caabuqyada Galmada La isugu Gudbiyo ee ku nool Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya. Warbixinta ayaa soo bixi doonta Disembar. iyada oo kaashaneysa hay'adaha UNAIDS, IOM, iyo WHO, waxaa 2008da la bilaabey sahan la socoshada hab-dhaqanka Soomaalida ee HIV. Cilmi-baarista ayaa la rajeynayaa in la soo gebagabeeyo bisha Jannaayo ee 2009 waxaana lagu aqoonsan doonaa hab-dhaqannada ugu muhiimsan ee HIV-ga iyo sida uu ugu badan yahay kooxaha ku jira halista ugu weyn ee ku nool saddexda soon ee Soomaaliya – Waqooyi-galbeed, Waqooyi-bari iyo Bartamaha/Koonfurta.

Iyada oo qayb ka ah dadaallada wacyigelinta, 25,687 ayaa lagu gaarey waxqabadyada qareemeynta bulshada ku dhisan, halka ay barayaasha jiilalka iskufilka ahi ay gaareen 5,492 qof iyaga oo u marey waxqabadyada la xiriira wargaarsiinta lagu beddalayo hab-dhaqanka. Dadaalladan u qareemeynta ahi waxa ay keeneen in 7,767 qof ay helaan adeegyada La talinta iyo Baaritaanka Ikhtiyaariga ah iyo in ay hadda 358 ay helayaan daaweynta *antiretraviral* iyo 2,616 oo iyana laga daweynayo caabuqyada fursad-gaadka ah. 14,943 qof ayaa iyana laga heley Caabuqyada Galmada La isugu Gudbiyo waxaana hadda daaweynta ku habboon lagu siinayaa xarumaha daryeelka caafimaadka.

In ka badan 2 milyan oo cinjirka galmada ah ayaa lagu qaybiyey xarumaha caafimaadka, famashiyeyaasha iyo dadaallada bulshada salka u tahay. Intaa waxaa dheer, in la qaybiey 1,044 xirmo oo loo isticmaalo daryeelka guriga dhexdiisa lagu siiyo dadka la nool HIV iyada oo loo marey xarumaha caafimaadka waxaana taageero aasaasi ah oo lacag la'aan ah helay 219 agoomo iyo carruur nugul ah. Waxaa la ogaadey in ay wanaagsanaadeen tabaha xubnaha kooxaha is-taageera ee dhinaca ARV, isticmaalka cinjirka galmada, si wanaagsan ula noolaanshaha HIV iyo dhimista ceebeynta iyo takoorka lala xiriiriyo HIV-ga.

Dhalinyarada ayaa sidoo kale lala beegsadey waxbarashada HIV iyo AIDS-ka waxaana la tababarey 845 barayaasha kuwa iskufilka ah iyo macallimiin isugu jira. Waxbarashada HIV iyo AIDS ayaa la dhexgeliyey 27 adeegyada iyo barnaamijyada dhalinyarada ah iyada oo loo marayo waxbarashada ku dhisan xirfadaha-nolosha.

Si hawshan loo xoojiyo, waxaa waaxo HIV-ga u qaabilsan laga dhex sameeyey Wasaaradaha Arrimaha Qoyska ee soon walba. Guddiyada Qaranka ee AIDS-ka ayaa la taageerey si ay u hoggaamiyaan isuduwidda arrimaha wax looga qabanayo HIV-ga, iyo si ay u xoojiyaan iskaashiga laga yeelanayo waxqabad si wanaagsan la isugu duwey oo ku aaddan HIV-ga, iyo si ay la-socosho iyo kormeerid joogto ah ugu sameeyaan shariikyada iska kaashanaya wax-ka-qabashada HIV-ga iyo si ay u xoojiyaan kartida waxqabad ee Xoghaynta kala duwan.

Aqoon is weydaarsi dib loogu eegayey Ballanqaadyada ku aaddan HIV/AIDS oo ay ka soo qayb galeen dhammaan hay'adaha ka wada hawlgala Sanduuqa Caalamiga ah ee la Daqaallanka AIDS-ka, Qaaxada iyo Duumada ayaa waxaa hoggaamiyey Xoghaynta AIDS-ka ee Soomaaliland, Puntland iyo Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya.

**845 barayaasha dadka iskufilka ah ayaa qaatey tababarka waxbarashada HIV/AIDS …**

## Guuliha Sanduuqa Caalamiga ah uu ka gaarey Soomaaliya – Xaqiiqooyin iyo Tirooyin

Xoghaynta kala duwan waxa ay qabteen shirar bille ah oo ay ka qabygalaan kooxaha isku shaqada ahiba, iyo aqoon-is-weydaarsiyo goboleed oo ku saabsan u qareemeynta iyo weliba shirar qaran oo muhiim ah.

In kasta oo diiradda la saarayey sidii loo xoojin lahaa kartida ay leeyihiin hay'adahan dowladda, haddana UNICEF waxa ay sidoo kale taageertey sidii loo dhisi lahaa kartida NGO-yada ee wax ka qabashada HIV iyo AIDS, waxaana ay gaartey 28 urur bulsho iyo saddex kooxood oo ah Dadka La Nool HIV/AIDS.

Shariikyada degaanka ee taageerada ka hela Sanduuqa Caalamiga ah ee la dagaallanka AIDS-ka, Qaaxada iyo Duumada, ayaa Soomaaliya oo dhan uga dabaaldegey Maalinta AIDS-ka ee Adduunka. Waxyaabihii halkaa laga qabtey waxaa ka mid ahaa iyada oo la sii daayey xaqiiqooyin ku saabsan HIV iyo AIDS iyada oo xoogga la saareyey muhiimadda ay leedahay jiritaanka hog-gaan og xaqiiqooyinka, muhiimadna dadka siiya, dhiirigeliya helidda adeegyada, taageera barnaamijyada ka hortagga oo car-ruurta ka hormariya dadka kale si natiijo looga gaaro wax ka qabashada HIV iyo AIDS-ka.

## Qaangaarka iyo HIV – Dhalinyarada oo hoggaamineysa dadaallada wax looga


© UNICEF Somalia/2008

Afar sano ka hor, Cabdiqani Xassan Maxamed oo 23 jir ah (sawirka bidix) marna kuma uu fikirin in uu tifaftiri doono majallo ka hadleysa HIV iyo AIDS. Suxufigaas da'da yar waxa uu weligiiba xiiseyn jirey in uu wax ka qoro arri-maha HIV iyo AIDS-ka, laakiin waxaa xakameynayey isaga oo aan haynin xog ku saabsan cudurka.

"Mar kasta oo aan qoro maqaal ku saabsan HIV iyo AIDS, waxa soo bixi jirey cabashooyin iga niyad jebiya in aan daabaco qaar ka mid ah sheekooyinka," ayuu yiri Cabdiqani. Laakiin arrimo si nasiib ah ku yimid ayaa beddeley xaaladda. Tan hore, waxaa Cabdiqani lagu marti qaadey tababar ku saabsan ka soo waramidda arrimaha HIV iyo AIDS-ka iyo Jinsiga/dheddig-laboodka. Tababarkaa waxa uu 2005tii ka dhacay Hargeysa waxaana qabanqaabiyey la-hawlgale ay UNICEF taageertey oo lagu magacaabo 'Health Unlimited'.

"Waqtigaa, xataa si fiican uma saxaynin qeexidda HIV iyo AIDS, wax yarna kama garaneynin jinsiga iyo sida uu xiriirka ula leeyahay cudurka," ayuu yiri Cabdiqani, oo markaa u soo warami jirey Raadiyo Boosaaso. "Tababarka waxa aan ku bartey ar-rimo iyo fikrado badan oo la xiriira HIV iyo AIDS, markii la soo gabagabeynayeyna waxa aan si xoog leh u aaminsanaa in aan wax ka qori karo arrinta," ayuu ku darey. Islamarkii tababarku dhammaadeyba, Cabdiqani waxa uu sheeko u qorey Raadiyo Boosaaso si uu u tijaabiyo sida ay dhegeystayaashu uga fal-celinayaan – gaar ahaan kuwii isaga hore u dhaliiley. Fal-celintoodu waxa ay ahayd mid wanaagsan. Markaa wixii ka dambeeyey, waa loo hambalyeyn jirey marka uu wax ka qoro mowduucan. Halkii ayuuna ka sii wadey. Isla sanadkaas, UNICEF ayaa dooneysey laba qof oo dhalinyaro ah oo tifaftirayaal ka noqda majallo cusub oo dhalinyarada loogu talogalay. Cabdiqani ayaa shaqada soo codsadey oo heleyna. "Habeenkaas ma seexan. Waxa aan rabey in aan qof kasta teleefoon u diro oo aan u sheego waxa dhacay. Waxa aan teleefoon u direy Shukri oo ka tirsaneyd 'Health Ulimited' oo igu martiqaaddey tababarka," ayuu yiri Cabdiqani oo ilaa hadda aad ugu faraxsan wixii dha-cay waqtigaa.

Majallada ay UNICEF taageerto oo magaceedu yahay 'Koor' oo wax ka qorta HIV/AIDS iyo Dhallinyarada waa qoraal siddeed bog ah oo soo baxa labadii biloodba mar. maqaalladiisa waxaa qora dhalinyaro waxaana ay ku wajahan yihiin dhalinyarada waxaana tifaftira dhallinyaro ku kala nool Soomaaliya oo dhan. Gudniinka Gabdhaha, ka-hortagga HIV, Jinsiga iyo HIV/AIDS, iyo Saboolnimada ayaa qayb ka ah arrimaha ay wax ka qorto majaladda.

Cabdiqani oo uu la shaqeeyo la-tifaftire kale, waxa uu soo ururiyaa sheekooyin ay qoreen dhalinyaro waxaana uu fiiriyaa ta-yadooda iyo sida ay ugu habboon yihiin cadad kasta oo majalladdu soo saarto. Cabdiqani oo markiisii hore aan waxba ka gara-neyn HIV iyo AIDS, hadda waxa uu noqdey mid ka mid ah kuwa loogu ixtiraam badan yahay suxufiyiinta Soomaaliyeed ee wax ka qora arrintan. Hadda waxa uu hay'adda wararka ee caalamiga ah ee Reuters uga soo waramaa arrimo ay ku jiraan HIV iyo AIDS-ka. Sanadkii 2008, waxa uu warbaahinta uu u shaqeeyo u diyaariyey laba barnaamij oo idaacadeed waxaana uu u qorey wax ka badan shan sheeko oo ku saabsan HIV iyo AIDS. Waxaa kale oo uu barnaamij ballaaran u diyaariyey Maalinta AIDS-ka ee Adduunka.

Culayska ugu weyn ee Cabdiqani haysta waa in uu u jawaabo dadka isku dayaya in ay ka niyad jebiyaan wax ka qorista mowduucan iyaga oo leh HIV iyo AIDS kama jiro Soomaaliya. Dhowr jeer ayaa xitaa lagu eedeeyey in uu wax ka qoro cudur aan ka jirin Puntland. "Waa arrin xannuun badan," ayuu yiri.

**Wixii xog dheeri ah oo ku saabsan barnaamijkeena ama sida aad noo taageeri karto, fadlan nagala soo xiriir:**


| | | |
|---|---|---|
| **Christian Balslev-Olesen, Representative** | **cbalslev@unicef.org** | **+ 254 722 514 569** |
| **Denise Shepherd-Johnson, Chief of Communication** | **dshepherdjohnson@unicef.org** | **+ 254 722 719 867** |
| **Robert Kihara, Communication Officer** | **rkihara@unicef.org** | **+ 254 722 206 883** |


**Nagu soo booqo www.unicef.org/somalia**